

Gabay (Dikt)

Gabaygan Xaaji Aadan, waxa uu kaga hadlayaa wax-wada qabsiga, isku tiirsanaanta, isu baahnida iyo kala maarmi-waaga dadyowga iyo unrmadaha adduunyada.

Dette diktet handler om : Hvordan menneskene på kloden er avhengige av hverandre og viktigheten av å hjelpe hverandre.



Adobe Stock / Ngupakarti

Si buuxda oo tifaftiran waxa uu u muujinayaa !n dhibaatooyinka maanta ka taagan nolosha dunida dhinac kastaba, ummadaha dunida u baahan yihiin mid hodan ah iyo mid sabool ahba, istaageer, wax-wada-qabsi iyo tixgelin si loo abuuru nolol ku dhisan sinnaan, caddaalad, xasillooni iyo barwaaqo.

Haddii ay sidaasi suurto-gashana waxa laga libeysanayaa cadowyada aadamiga ee ay ka mid yihiin, gaajada, cudurka, deooo-d?rrida iyo is-afgaran-waaga. Dhinac kale haddii la eego, waxa uu tusayaa Xaajigu xirnaanta ay isku xiran tahay nolosha dadyowga adduunka iyo sida aan ummadina ummadda kale uga ;Taarmayn ama hodannimo, xoog iyo cilmi sare ha ahaato ama yey lahaanine.

Dhab ahaan haddii loo dhuuxana falsafadda ka dambeyna gabaygan waxa ay tahay in aan midabka dubka ee ummadaha dunidu ku tkarin in ay ku kala sarreeyaan looguna kala burin xagga kartida, ragannimada iyo cilmiga maanta lagu kdla horreeyo haddii sida maanta lå isugu faano lagu sii wadana

ay dunidu ku dambaynayso dagaal, wax alla wixii horumar la gaadhey duminaya oo
aan cidina ka nabad-geli karaynin buu si fiican u qayaxay.

Dubkaa kala taggane haybta weysugu tegeynaaye

Cilmi maaha kaa tamar badniyo tiir biraan ahaye

Ninba tiisu waa dhimantahoo tooggo-beel ma lehe

Tabantaabo lays caawiyaa waa tu waaiib ahe

Dhibtu waxay ka timid uumiyaha tirada weyn gaarey

Tisciin gaajo laysaa jiroo toban dhergeysaaye

Kuwaasoo wuxuun lagu taray tahay aqoontiiye

Mar haddii cadliga laga tagoo lays tix-gelin waayey

Inay nabadi taam noqoto waatu aan la eegeyne

Sawaariikh nin taabiyo ninkii toorri bira haysta

Ninba tuu awoodaba dil waysugu tegaayaane

Naftu waa tu qudha oo ma iiro. taaiir hadhayaaye

Tusbax weeye gees laga f uroo tuug is-wada raacye

Gantaalaha tamuu.miyo suntaatuurista u dhow e

Haydaro-jiinkaa ku tuman tacabkii iinsaane

Taariikhda weyn iyo cilmaa taa ku baabi,,iye

Marka ay xadaaradi tagtee taangi ku cayaaro

Ee boqolka tobankii hadhaa tuna awood waayo

Tiih iyo.mugdaa lagu dambayn tii la soo maraye

S harkaa taabba-geli khayrna waa taa la kaarahaye

Xil ma taabin nimankii waqtigan taabka buuxsadaye

Ummaddii timaadaaba waatay nacdalayaane

Allow yaa dhib waxa loo tabcaday sarne ku hageera

Laylis:

1. Gabaygan yaa curiyey? Maxaanu ka hadlayaa?

2. Maku raacsantahay gabayaaga fikraddiisa guud ahaaneed ee uu ku muujiyey waxa uu ka qabo dunida?

3. Ka hadal ummadaha hodanka ah iyo kuwa saboolka ahi siday isugu baahan yihiin adiga oo maskaxda ku haya in heerka dhaqaalaha laga marayo oo kale ah aan ummadaha lagu kala sooci karayn, loona baahanyahay in laga fiirsado dhinacyo badan oo ay ka mid yihiin garaadka, hantida, aqoonta iyo cilmiga.

4. Ma ku raacsan tahay gabayaaga meeriskan ujeeddadiisa?

"Ninba tiisu way dhimantahoo . tooggo_beel ma lehe.

Tooggo-beelse waa maxay?

5. b) Qor kana hadal meeriska gabayga ku jira ee muujinaya tirada dadka adduunka iyo sida la yaabka leh ee ay u sii kordhayso, iyo dhibaatooyinka laxaadka leh ee umadaha adduunka u soo hoyanaya.

t. Tirada dadka aduunku in ay sannadba sannadka ka sii danbeeya kor u kacdo maxaa u sobob ah?

6. Qor meeriska muujin kara in hodan iyo saboolba wedka loo siman yahay haddii nabaddu cirka isku shareerto oo hubka. la isu soo gurto.